KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 1 Maarso 1975 **L. 3**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudelieeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 20, Tr. 8 Febberayo 1975 — *Mideynta Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed iyo Bankiga Ganacsiga Soomaalida.* Bog. 209

SHARSI L. 21, Tr. 8 Febberayo 1975 — *Beddelidda Magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.* » 210

SHARSI L. 22, Tr. 23 Febberayo 1975 — *Dhisidda Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta Soomaaliyeed (Somali Shipping Agency).* » 210

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKa, Tr. 8 Febberayo 1975, L. 33 — *Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Ganacsiga Ummadda.* » 218

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 8 Febberayo 1975, L. 34 — *Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Drexe ee Soomaaliya.* » 219

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 18 Febberayo 1975, L. 35 — *Xeer ku saabsan Tariifo gelinta Telefonka Dalka Gudihiisa.* Bog. 220

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 18 Febberayo 1975, L. 36 — *Beddelaad Qodob ku saabsan. Taariifada Telekiska (Telex).* » 224

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 9 Febberayo 1975, L. 37 — *Magacaabid Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadhe Qaybta Wakiillada Beesha.* » 225

XEER WASAARADDA BOSAHA ISGAARSIINTA, Tr. 15 Febberayo 1975, L. 38 — *Tigidhka boqol - guurda UPU.* » 227

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Nofembere 1974, L. 39 — *Qaadid Guri dan guud owgeed.* » 228

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Nofembere 1974, L. 40 — *Qaadid Guri dan guud owgeed.* » 229

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, Tr. 17 Febberayo 1975, L. 41 — *Heerka Sarrifka lacagaha Qalaad.* » 230

# BOGGA KOWAAD
# S H A R C I

**SHARCI L. 20, Tr. 8 Febberayo 1975.**
**Mideyn Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed iyo Bankiga Ganacsiga Soomaalida.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 1 ee 11kii Diseembar 1970 oo lagu dhisay Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 2 ee 11kii Diseembar 1970 oo lagu dhisay Bankiga Ganacsiga Soomaalida;

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in la mideeyo' labada banki oo kala ah Bankiga Kaldsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed iyo Bankiga Ganacsiga Soomaalida;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda ee 6dii Febaraayo 1975.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 8da Febaraayo 1975 labadii banki oo la kala oran jirey Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed iyo Bankiga Ganacsiga Soomaalida waa la mideeyey waxaana loobaxshey Bankiga Ganacsiga Ummadda.

Qodobka 2aad

Bankiga Ganacsiga Ummaddu wuxuu dhaxlayaa xaaladihii xagga sharciga ay kaga sugnaayeen labada banki ee la mideeyey, wuxuuna yeelanayaa wax allaale wixii shaqaale, qalab, hanti, xuquuq iyo waajibaad ha oo ay lahaayeen labadaas banki maalintii la mideeyey.

Qodobka 3aad

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 8da Febaraayo 1975, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L. 21, Tr. 8 Febaraayo 1975.**
**Beddelidda Magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lr. - ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofeembar 1968 oo lagu dhisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda fadhigoodi wadajirka ahaa ee odii Febaraayo 1975.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 2aad

Laga bilaabo 8da Febaraayo 1975 magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed waxaa loo beddeley Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 1aad

Sharcigaan wuxuu hirgalayaa 8da Febaraayo 1975 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

**SHARCI L. 22, Tr. 23 Febberayo 1975.**
**Dhisidda Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta ee Soomaaliyeed.**
**(Somali Shipping Agency).**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINYAY Go'aankii G.S.K. yo Golaha Xoghayayaasha;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

## Qaybta I.

## HABKA DHISMAHA GUUD

### Qodobka 1aad

*Dhismaha Wakaaladda*

1. Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta ee Soomaaliyeed (Somali Shipping Agency) ayaa halkan lagu dhisay waxaana hadda ka dib lagu tilmaami doonaa «Wakaalad».

2. Wakaaladdu waxay ka mid ahaan doontaa Wakaaladaha Dowladda ee Madaxa Bannaan, waxeyna yeelan doontaa jirid iyo astaan sharci ah.

3. Wakaaladdu waa iney u hoggaansanaato Sharciyada iyo Xeerarka saameeya Wakaaladda Madaxa Bannaan ee Dowladda, gaar ahaan:

b) Xeerka L. 16 soo baxay 1dii Abriile 1970 ee Faaqidaada xisaabaadka Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

t) Xeerka L. 58 taariikh 31 Luuliyo 1972 ee Lacagta Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

j) Xeerka L. 36 aariikh 22 Abriil 1972 ee shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan, iyo wixii beddelaad ah ee lagu sameeyey kadib.

### Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda*

Barunta Wakaaladda waxey ahaan doontaa Xamar, waxeyna ku yeelan doontaa Gobollada iyo Degmooyinka laamo ama Xafiisyaal hoose meeshii looga baahdo.

### Qodobka 3aad

*Ujeeddooyinka iyo hawlaha Maraakiibta*

I. Guud ahaan, ujeeddada Wakaaladda waxey tahay inay maamusho hawl kasta oo ku lug leh gaadiidka badda (ha ahaadeen Maraakiibta ama Doonyaha) inta ay marayaan Badda Soomaaliyeed.

II. Wakaaladda waxa loo xilsaaray hawlaha Guud ee Maraakiibta iyo Doonyaha inta ay Dalkeenna joogaan, gaar ahaan:

1. Diyaarinta xaashiyaha fasaxyada soo gelliinka iyo bixidda Maraakiibta iyo Doonyaha

(3)



2. Maamulka hawlaha ee Maraakiibta iyo Doonyaha inta ay Xeebta Dalkeenna joogaan oo ay ka mid yihiin:

   i) in loo iibiyo Maraakiibta wixii ay u baahdaan, biyo, saliid, alaab, iwm.; cuntada Maraakiibtu u baahan yihiin waxa u iibin doona Iskaashatada Sahaysiinta Maraakiibta iyadoo sii marin doonta Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta;

   ii) diyaarinta doonyaha matoorka ku socda iyo siinka maraakiibta lagula hadlo (VHF - HF);

   iii) maamulidda sidii marakiibta iyo doonyaha nabadgelyadooda loo ilaalin lahaainta ay joogaan Dekedaha iyo Badda Soolimaayeed;

   iv) daryeelidda danaha badmaaxyada kii xannuunsanaya, oo takhtar la geeyo, kii dhoofaaya oo la dhoofiyo, kuwa islaaya oo la dhexdhexaadiyo, iyo waxyaabaha kale ee la xiriira;

   v) in loo qabto maraakiibta wixii sameys deg deg ah ee ay u baahan yihiin;

   vi) dacwooyinka Maraakiibta iyo Doonayaha ama kuwa ayagu ka oogaan Maxkamdaheenna oo looga doodo lana dhex dhexxaadiyo haddii loo baahdo.

3. Hawsha soo saaridda iyo dirida alaabta (Forwarding and Clearing Services).

4. In la kor joogo shaqada Markabka si joogto ah (Around the clock operation Supervision) ilaa inta shaqada dejintu ama rarrinku ay dhammaanayso.

5. Alaabta Maraakiibtu keento waa in dadka leh la ogeysiiyo.

6. Bixinta xaashiyaha rarriinka (Bill of Lading-Shipping Order).

7. Daba jooga iyo raad-raaca alaabta lagu soo wadey Dekedaha Soomaaliyeed ee dhexda ku lunta ama la waayo.

8. Maamulka xisaabaha kaga xidhan ama ay ku yeeshaan Maraakiibtu dalkeena ama nool ha ahaato ama kharash kale ama magdhaw ay warsadaan.

9. In la baaro marka shil ku dhaco Markabka ama Doonyaha loona qabto guddi baara, (Inquiry committee).

10. Waxa Maraakiibtu ku sugan yihiin hadba la oggeysiiyo xaqlayaasha (Owners).

11. Dilaalidda Noolka Maraakiibta (Ships Brokerage Commission).

12. Diyaarinta iyo Qaybinta xaashiyaha alaab goobida Maraakiibta la saaro ama ay keenaan (preparation and distribution of arrival and departure manifests).

Qodobka 4aad

*Awoodda Wakaaladda*

Wakaaladda awood buuxda bey leedahay si ay u fuliso hawlaha loo xilsaarey sida ku tilmiiman qodobka 3 aad ee sharcigan.

Qodobka 5aad

*Kormeerka iyo Ilaalinta Guud*

Kormeerka iyo Ilaalinta Guud ee Wakaaladda waxa doona Xoghayaha Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda.

Qaybta II.

DHISMAHA GUDAHA

Qodobka 6aad

*Maareeyaha Guud*

1. Wakaaladda waxa madax u noqon doona Maareeye Guud, waxaana lagu magacaabid doonaa Xeer Goddoonshaha G.S.K. uu soo saaro isagoo tixgelinaaya talada Xoghayaha Wasaaradda Kalluunka iyo Gaaddidka Badda.

2. Wakaaladdu waxay yeelan doontaa waaxyo iyo laamo hoos yimaada maamulka Guud.

Qodobka 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

Isagoo u hoggaansamaaya sharciyada iyo xeerarka yaal, Maareeyaha Guud waxa loo xilsaaray inuu xagga sharciga masilo Wakaaladda fuliyana hawlaha ku xusan qod. 3aad ee sharcigan, Maareeyahu wuxuu awood u leeyahay:

b) Inuu saxiixo heeshiisyada ay Wakaaladdu dhinaca ka tahay;

t) Inuu mas'uul ka noqdo habka maamulka Wakaaladda wuxuuna qaadan karaa go'aanno xagga maamulka iyo shaqaalahaba sida sharcigu qorayo;

j) Inuu mas'uul ka noqdo lacagta hantida Wakaaladda asaga oo raacaya sharciga Dalka.

x) Inuu bixiye wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamuka Guud ay hab fiican ugu socdaan sharcigana waafaqsan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawl la xiriira maamulka shaqada Wakaaladda ee caadiga ah;

d) Awood buuxda wuxu Maareeyaha Guud u leeyahay in haddii la isku afgaran waayo ama ay lagama maarmaan noqota in khidmadaha kor loo qaado ama hoos loo dhigo inuu u soo jeediyo talo ahaan Xoghayaha Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda iyo Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda oo iyagu awood buuxda u leh in dhammeystiraan.

## Qodobka 8aad

*Xuquuqda iyo dhaqaalaha shaqaalaha wakaaladda*

Xuquuqda iyo dhaqaalaha Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka L. 36 taariikh. 22-4-72 ee ku saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa bannaan iyo sharciga L. 17 taarikh. 21kii Abriil 1974 qaybta III Hantida iyo Lacagta Wakaaladda.

## Qodobka 9aad

*Magacaawga Agaasimayaasha*

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasimayaal waaxyo (Direttore Dipartimento) oo lagu magacaabi doono Xeerka Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya talada Xoghayaha Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda iyo tan Maareeyaha Guud.

## Qodobka 10aad

*Hantida Wakaaladda*

Hantida Wakaaladda waxey ka kooban tahay:

1. Lacagta ay Dawladda Soomaaliyeed ka siiso Wakaaladda Miisaaniyadda Sannadka;

2. Wixii lacag ah ee ka gala hawsha ay qabto Wakaaladdu;

3. Wixii lacag kayd ah ee sannad kasta u dhiganta Wakaaladda (Reserved Fund);

4. Wixii hanti ah ee ka soo gala Wakaaladda deeq ama si kale.

## Qodobka 11aad

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oiitoobar ama inta ka horreeysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda ku saabsan sannadka maaliyadda soo geleysa isaga oo faahfaahinaaya kuna muujinaaya lacagta soo geli doonta ama bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hordhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayaha Wasaaradda Lacagta iyo Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa iney ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

Qodobka 12aad

*Xidhitaanka Miisaaniyadda*

Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridas misiaaniyadda xidhitaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyey xisaabihii sannadka iyo bandhigii macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, taana uu u gudbiyo Wasaaradda Lacagta iyo Kalluunka iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 13aad

*Amaah*

Wakaaladdu iyadoo haysata Guddoonka Wasaaradda Maaliyada wax wey ka amaahan kartaa Bankiyada.

Qodobka 14aad

*Kharashka iyo Khidmadda Wakaaladda*

Wakaaladdu ka qaadaneysaa Maraakiibta, Doonyaha ay hawsha u qabaneyso lacag kharash ama khidmad, hawsha soo saarida iyo dirida alaabta iyo dilaalidda Maraakiibta, iyo raadinta alaabta iyo caddaynta Caymiska loo qoro (Application Fees), sida lagu tilmaamay lifaaqa halkan ku xiran oo ka mid ahaan doona qodobada sharcigan.

Qodobka 15aad

*Shaqaale*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ba geli karaan ganacsi, dillaal ama farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Wakaaladda iyo Wawladda.

Qodobka 16aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxa qabnaya Xeerka Lamb. 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qaybta III.

QODOBKA XIDHITAANKA

Qodobka 17aad

*Xeerka Guud*

Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay, isagoo tizgelinaaya talada Xoghayaha Wasaaradda Kallunka iyo Gaadiidka Badda, inuu guddoomiyo Xeer Guud ee saameeya Wakaaladda dhismaheeda (Etablishment).

Qododbka 18aad

*Burin Sharciyadii Hore*

Sharciga tirsigiisu yahay 14 ee soo baxay 4tii Maajo 1974, iyo Sharciyada kale oo ka soo horjeeda ama aan la soconin Sharcigan waa la baab'shey.

Qododbka 19aad

*Dhaqan Gelid*

1. Sarcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha G.S.K. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed.

2. Sarcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliyeed.

3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale iney dhawraan qodobada sharcigan.

Muqdisho, 23 Febberayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

LIFAAQ (Annex)

**KHIDMADDA IYO KHARASHKA WAKAALADDA**

1. **Khidmadda Wakaaladda (Agency Fees).**

Wakaaladdu waxay ka qaadaneysaa maraakiibta ku xirata dekedaha Soomaaliyeed khidmad lacageed ee ah sida hoose ku qoran:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| b) | 2.000 So. Shs. | Markabka saliidda (Tankar) | safar | walba; |
| t) | 1.500 So. Shs. | Markabka xamuulka | » | » |
| j) | 800 So. Shs. | Markabka daqaalka | » | » |
| x) | 600 So. Shs. | Doonta kalluumeysiga | » | » |

2. **Khidmadda dillaalka (Commission Fees).**

Wakaaladdu waxay ka qaadaneysaa xamuulka (Freight) maraakiibta iyo dadka dhoofaya khidmad sida hoos ku qoran:

| | | |
|---|---|---|
| b) | 2% | xamuulka la keenayo; |
| t) | 5% | xamuulka la dirayo; |
| j) | 7% | qabanqaabista dhoofka. |

3. **Kharashka dalabka keenidda alaabta.**

Kharashka dalbka keenidda alaabta wuxuu ahaan doonaa sida soo socota:

b) 2,50 So. Shs. alaabta soo geleysa;
t) 4,00 So. Shs. alaabta baxeysa;

4. **Kharashaka saaridda xoolaha nool.**

Kharashka laga qaaday saaridda xoolaha nool wuxuu ahaanayaa:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b) | Geela | So. Shs. 1,50 | Neefkiiba; |
| t) | Lo'da | So. Shs. 1,50 | Neefkiiba; |
| j) | Ariga | So. Shs. 0,30 | Neefkiiba; |

5. **Khidmadda Wakiilnimada Doonyaha.**

Khidmadda laga qaadi doono Doonyahay wuxuu ahaan doonaa sida hoose:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b) | Doonyaha Soomaaliyeed | So. Shs. 20 | Doontiiba; |
| t) | Doöyaha Shisheeyaha | So. Shs. 150 | Doontiiba; |

6. **Khidmadda Noolka (kan gudaha iyo dibaddaba) (Inward-Outward Commission).**

Khidmadda Wakaaladda ee Noolka waxa weeyi Boqolkiiba Laba (2%).

7. **Kharashka soo saarida alaabta (Clearing Services).**

Kharashka laga qaadi doono alaabta la soo saaro (Clearing Services) waxa weyi sida soo socota:

b) 10kii Kiintaal ilaa 50kii Kiintaal 40/- - 90/- So Shs.
t) 50kii Kiintaal wixii ka baddan, Kiintaalkiiba 2/- So. Shs.
j) Entrygii walbana 50/- So. Shs.

8. **Kharashka Alaabta la dirayo (Forwarding Services).**

Kharashka laga qaadi doono alaabta la dirayo waxa weyi sida soo socota:

b) Alaabta Dadka (Personal Effects), halkii kiintaal - 20kii kiintaal 150/- So. Shs.
t) 20kii Kiintaal wixii ka baddan ee ah alaabta dadka iyo alaabta kale ee dhan kiintaalkiiba 2/- So. Shs.
j) «Entrygii» walbana 80/- ilaa 100/- So. Shs.

9. **Kharashka Raacdeynta alaabta iyo caddeynta Caymiska loo qoro.**

Kharashka arjiga alaabta aan soo degin ama lunta (Application Fees for shortlanded-Lost Goods), waxa weeyi arjigiiba 15/- So. Shs.

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 8 Febberayo 1975, L. 33.**
**Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Ganacsiga Ummadda.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo an 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 1 ee 11kii Diseembar 1970, oo lagu dhisay Bankiga iyo Amaahda Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 2 ee 11kii Diseembar 1970, oo lagu dhisay Bankiga Ganacsiga Soomaalida;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 20 ee 1-3-1975 oo lagu mideeyey Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaaliyeed iyo Bankiga Ganacsiga Soomaalida laguna magacaabay «Bankiga Ganacsiga Ummadda»;

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in Bankiga Ganacsiga Ummadda loo magacaabo Agaasime Guud;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda ee 6dii Febaraayo 1975;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

In laga bilaabo bisha Febaraayo 8da, 1975, loo magacaabo Jaalle Shariif Seen Abow jagaada Agaasime Guud ee Bankiga Ganacsiga Ummadda.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 8 Febberayo 1975, L. 34.**

**Magacaabid Agaasimaha Guud, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAOGO ARKAY Sharciga dhismaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26kii Nofeembar 1968;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 21 ee 1-3-1975 oo magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed loogu beddeley Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in Bankiga Dhexe ee Soomaaliya loo magacaabo Agaasime Guud;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda ee 6dii Febaraayo 1975;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

In marka laga bilaabo 8da Febaraayo 1975, loo magacaabo Jaalle Saciid Maxamed Cali jagada Agaasime Guud ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 18 Febberayo 1975, L. 35.**
**Xeer ku Saabsan Tarifo Gelinta Telefionka Dalka Gudihiisa.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka 21kii Oktbooar 1969;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha lambarkiisu yahay 58 ee 16-3-1966.

ISAGOO TIXGELINAYO Baahida loo qabo in tariifo cusub loo sameeyo Gelinta Telefoonka iswada ee Dalka Gudihiisa;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

*Kharashka Telefoon Gelinta*

1. Telefoon Gelinta ugu horeysa kharashkeedu, marka sanduuqa xariga laga soo qaaday iyo meesha la dhigay Telfoonka inta u dhaxaysa, dhererkeedu yahay 50 mitir, waa Sh. So. 300.00, wixii ka badan 50 mitir waa Sh. So. 1.50 mitirkiiba.

2. Telefoon, guri ama xafiis yaal, haddii lagu kordhiyo mid kale oo ay isku lambar yihiin, kan dambe kharashka gelintiisu wa Sh. So. 100.00.

3. Telefoon, guri ama xafiis yaal, haddii mid kale lagu kordhiyo, oo kan dambe aadayo guri ama xafiis kale oo dibadda ah kharashka gelinta kan dambe wuxuu ku xiran yahay, hadba qiyaasta dhererka labada meelood u dhexeeya intuu yahay.

4. Kharashka gelinta dawanka (bell), kiiga (key) iyo balaaga (plug) intuba, markay gudaha yihiin waa Sh. So. 50.00.

Qodobka 2aad

*Kharashka Telefoon gelinta Gobollada iyo dagmooyinka*

1. Gobollada iyo Degmooyinka leh Telefoonka iswado, qofkii doonayo in Xafiis ama Guri loo geliyo Telefoon, wuxuu bixinayaa . . . . . . . Sh. So. 300.00

2. Qofkii horay u heystey Telefoonka Gacanta lagu wareejiyo (Manual), oo markii hore bixiyay Sh. So. 150 Boqol iyo Konton, oo doonaya in loo geliyo telefoon iswado, wuxuu bixin doona oo keliya . . . . » » 150.00

Qodobka 3aad

*Kirada Telefoonka Saddexdii Biloodka laga qaado (marku laynka dibadda maro)*

| | | |
|---|---|---|
| 1. Ganacsi leyn . . . . . . . | Sh. So. | 90.00 |
| 2. Ganacsi leyn, haddii laba Telefoon ku xiran yihiin mid kood waa . . . . . . . . | » » | 90.00 |
| Kan kalena waa . . . . . . . | » » | 75.00 |
| 3. Telefoon guri . . . . . . . | » » | 60.00 |
| 4. Leyn guri, haddii laba Telefoon wadaagto, midkood waa . . . . . . . . . | » » | 60.00 |
| Kan kalena waa . . . . . . . | » » | 50.00 |

Qodobka 4aad

*Khabashka Wicidda (Wicidda Gudaha ah)*

| | | |
|---|---|---|
| 1. Wicid Ganacsi . . . . . . . | Sh. So. | 0.25 |
| 2. Wicid Guri . . . . . . . . | » » | 0.15 |

Qodobka 5aad

*Kharashka bedelaadda*

| | | |
|---|---|---|
| 1. Haddii Telefoon meeshuu hore u yiil laga bedelo, oo meel kale oo dibadda ah la geeyo, asaney qiyaasta labada meelood u dhaxayaa ka badnayn 50 mitir, qiimaha bedelaadu waa . . . . . . . | Sh. So. | 150.00 |
| Haddii qiyaastu ka badato 50 mitir, mitirkii kordhaaba qiimihiisu waa . . . . . . . | » » | 1.50 |
| 2. Haddii Telefoon meeshuu yiil laga bedelo, oo meel kale ee isla guriga gudihiisa ah lagu xiro, qiimaha bedelaadu waa . . . . . . . . . | » » | 50.00 |
| 3. Magac bedel waa . . . . . . . | » » | 30.00 |

Qodobka 6aad

*Qiimaha wicidda telefoonka dadweynaha kadhxeeeyo*

| | | |
|---|---|---|
| Telefoonka Dadka ka dhexeeyo ee lacagta lagu rido, wicidda laga sameeyo qiimaheedu waa . . | Sh. So. | 0.50 |

Qodobka 7aad

*Telefoonka gacanta lagu wareejiyo (Manual)*

*Qiimaha Gelinta*

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Gelinta Telefoonka gacanta lagu wareejiyo, haddey qiyaasta sanduuqa iyo guriga u dhaxaysaa ka badnayn 50 mitir, waa . . . . . . . | Sh. | So. | 150.00 |
| Wixii 50 mitir dheer, mitirkiiba waa . . . | » | » | 1.50 |
| 2. Haddii Telefoon, guri ama xafiis yaal, mid kale daro, gelinta kan dambo waxay noqonaysaa . . | » | » | 100.00 |
| 3. Gelinta dawanka (bell), kiiga (key) iyo balaaga (plug), wexey noqonaysaa . . . . . . . | » | » | 50.00 |

Qodobka 8aad

*Kirada etlefoonka gacanta lagu wareejiyo (Manual) saddexdii*

*Bilood haddii leynku dibadda maro*

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Ganacsi leyn . . . . . . . | Sh. | So. | 75.00 |
| 2. Laba Telefoon, hadday wadaagto leyn ganacsi, midkood waa . . . . . . . . . . | » | » | 75.00 |
| Kan kalena waa . . . . . . . . . | » | » | 60.00 |
| 3. Leyn guri . . . . . . . . | » | » | 60.00 |
| 4. Leyn guri, hadday wadaagto laba telefoon, midkood waa . . . . . . . . . . | » | » | 60.00 |
| Kan kalena waa . . . . . . . . . | » | » | 45.00 |

*(Haddii leynku gudaha yahay)*

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Leyn ganacsi, hadday laba telefoon wadaagaan, midkood waa . . . . . . . . . . | Sh. | So. | 45.00 |
| Kan kalena waa . . . . . . . . . | » | » | 30.00 |
| 2. Dawaanka (bell) kiiga) (key) iyo balaaga (plug) waa . . . . . . . . . . | » | » | 15.00 |

*Kirada Telefoonada isku xiran laga qaado*

*saddexdii biloodba (marka laynka gudaha yahay)*

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Ganacsi leyn Telefoonkii lagu kordhiyo, dibadda ha u baxo ama gudaha, waa . . . . . | Sh. | So. | 45.00 |
| 2. Leyn guri Telefoonkii lagu kordhiyo, dibadda ha u baxo ama gudaha ha maree waa . . . . . | » | » | 30.00 |
| 3. Dawanka (bell) kiiga (key) waa . . . . | » | » | 15.00 |

*Xudimaha yaryar ee telefoonada (Centralini)*

*(Kirada laga qaado saddexdi biloodba)*

| Xudinta (Centralini) Qaadkeedu yahay | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 120 | Leyn | Sh. | So. | 1.800.00 |
| 100 | » | » | » | 1.500.00 |
| 80 | » | » | » | 1.200.00 |
| 50 | » | » | » | 750.00 |
| 30 | » | » | » | 450.00 |
| 20 | » | » | » | 300.00 |
| 15 | » | » | » | 225.00 |
| 10 | » | » | » | 150.00 |
| 7 | » | » | » | 105.00 |
| 6 | » | » | » | 90.00 |
| 5 | » | » | » | 75.00 |
| 4 | » | » | » | 50.00 |
| 2 | » | » | » | 30.00 |

Qodobka 9aad

Haddii meel lahayd telefoon gacanta lagu wareejiyo (Manual), loo bedelo telefoonka iswada (Awtomatic), Tariifada Telefoonka isla markiiba waxay isu bedelaysaa tan «Telefoonka iswada» ee ku qoran sharcigan (qodobada 2-3).

Qodobka 10aad

Xeerka lambarkiisu yahay 58 ee 16-3-1966 waxaa lagu baabi'iyey xeerkaan, wax alla wixii ku saabsan tariigadaha Wadanka gudihiisa, waxaa saldhig u noqon doono xeerkaan.

Qodobka 11aad

Xeerkaani waxaa lagu faafin doonaa warqadda faafin rasmi ah, wuxuuna dhaqan galayaa deg-deg.

Muqdisho, 18 Febberayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Boosaha iyo Isgaarsiinta
*Dr. Cabdullahi Cosoble Siyaad*
*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 46.*
*Muqdisho, 23 Febberayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 18 Febberayo 1975, L. 36.**
***Beddelaad Qodob ku saabsan Taarifada Telekiska (Telex).***

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka lambarkiisuna yahay 66 ee 25kii Sebtember 1971;

ISAGOO ARKAY Dekreetada Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka lambarkeeduna yahay 10 soona baxday 15kii Diisambar 1971;

MARKUU FIIRIYEY Baahida loo qabo in hawlaha Teleiiiska la kordhiyo;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Qodobka 6aad ee Dekreetada lambarkeedu yahay 10 kuna saabsan Taariifada Shaqada Telekiska in loo beddelay sida soo socota:

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, waxa loo idmay iney kale harto dakhliga ka soo gala Hawlaha Telekiska (Telex Services) boqolkiiba toban (10%).

Qodobka 2aad

Xoghayaha Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxa loo idmay inuu lacagtass ah 10% (boqolkiiba toban), u kala qaybiyo hawlaha hoos ku qoran:

i) 50% (boqolkiiba konton) dhismaha, iibinta iyo beddelaadda qalabka Telekiska.

ii) 50% (boqolkiiba konton) abaalgud shaqaalaha muujiya xilkasnimo, dedaal iyo Kacaanimo, amase u keena hindise cusub habka farsamada Isgaarsiinta iyo wixdi kharaja ee kale oo lagama maarmaan u noqda howlaha Wasaaraddan.

Qodobka 3aad

Xeerkaan degdeg buu u dhaqan galayaa.

Muqdisho, 18 Febberayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

*Jaalle Dr. Cabdullahi Cosoble Siyaad*
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta

Xoghayaha Dawladda Wasaaradda Maaliy.
*Jaalle Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 47.*
*Muqdisho, 23 Febberayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 9 Febberayo 1975, L. 37.**
**Magacaabid Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadhe — Qaybta Wakiillada Beesha.**

XOGHAYAHA DOWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yaha 52 ee 8-6-1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-11-1972; dhammeystirka lambar 1 ilaa lambar 9 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Dekreetada lambarkeedu yahay ADM-6-5-1722, taariikh 8-4-1974 ee lagu magacaabay Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadhe Qaybtiisa Wakiillada Beesha;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 118, taariikh 1-1-1974, lagu maadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 1-11-1974, lambar 11, saabsan Degmooyinka laga beddelay qaybta derejada (c) loona beddelay qaybta darejada (b);

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadhe Qaybtiisa Wakiillada Beesha, iyadoo la waafajinayo qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Hoose;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxanyihiin waxaa loo magacaabay inay noqdaan idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadhe qaybtiisa Wakiillada Beesha:

1. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Cadiraxmaan «Qotoje»,

2. Jaalle Macallin Daahir Cumar,
3. Jaalle Akhtar Cismaan Cali,
4. Jaalle Khadiija Bashiir Ismaaciil,
5. Jaalle Seynab Macallim Xuseen,
6. Jaalle Maxamed Cismaan Ciise,
7. Jaalle Baaheero Baana Muusa,
8. Jaalle Cabdi-naasir Sheekh Qaasim,
9. Jaalle Xaaji Axmed Xaaji Yuusuf,
10. Jaalle Xaaji Diiriye Dinix Ducaale,
11. Jaalle Yuusuf Xuseen Cali,
12. Jaalle Aadan Mursal Ducaale,
13. Jaalle Maxamuud Cabdulle Beyle «Ilka-qor».

*Dhagan gal*

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974, waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee qaranka.

Muqdisho, 9 Febberayo 1975.

Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 38.*
*Muqdisho, 13 Febberayo 1975.*
*Hantidhowraha Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER WASAARADDA BOOSAHA ISGARSIINTA

Tr. 15 Febberayo 1975, L. 38.
Tigidhèa boqol — guurada UPU.

WSAAARADDA BOOSTADA ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aa iyo tan 2aad ce Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 22aad iyo kan 23aad ee Sharciga Boostada Lr. 62 soona baxay 22-9-1971;

ISAGOO DHEGEYSTAY Talada Guddiga Filateliga;

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in la soo saaro tigidho laba qiime ah oo lagu xusayo boqol-guurada Ururka Boostada Adduunka laguna magacaabay «Boqol-guuradii UPU oo 4 midab leh;

WUXUU GUDDOOMINAYAA

Qodobka 1aad

In la soo saaro laba (2) tigidh oo xus ah laguna magacaabay «boqol-guurada Ururka Boostada Adduunka» (UPU), qiimahooda iyo tirada la, daabacayna ay yihiin:

Sh. So. 0,50 tirada 100.000

Sh. So. 3,00 tirada 100.000

Tigidhadaas waxa lagu daabacay Istituto Poligrafico dello Stato di Roma, waxaana lagu sameeyey xaashiyo aan ahayn filigranata, tigidhka qiimihiisu yahay Sh. So. 3,00 waxa ku sawiran faras qof fuushan yahay iyo dhir-cabbir-waxa weeye 30x40, ilkohooduna waa 14 labadii centimetirba.

Qodobka 2aad

Tigidhada, oo xus ah, waxay socon doonaan muddo laba cannadood ah oo laga bilaabo 15-2-1975 waxayna dhici doonaan 15-2-1977.

Muqdisho, 15 Febberayo 1975.

Xoghayaha Boostada Isgaarsiinta
*Dr. Cabdullahi Cosoble Siyaad*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Tr. 19 Nofembere 1974, L. 39.

**Qaadid guri dan guud owgeed ee waqti hire la siiyay Maka Sheekh Cismaan oo ay la wareegatay Dowladda Solimaalyeed — kana socdo dhismo Masaajidka Weeyn ee Xamar.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddi Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed L. 85 ee Rep. taarikhdu markay ahayd 4 Luuliyo 1973, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. L. 16 ee 12 Agosto 1973, taas oo lagu siiyay, gacantana loo geliyay (Libera Disponibilità) Jaalle Maka Sheekh Cismaan cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 774, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Waaberi agagaarka Taalada dhagax tuur;

ISAGA OO ARKAY Warqadda qiimaynta guriga ee 14 Nov. 1974 soo sameeyay Arch. ka tirsan Waaxda Qorshaynta iyo Hindisaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqato qiimaha oo dhan Shs. So. 86.636.;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday dan guud owgeed gurigaas oo ay leedahay Maka Sheekh Cismaan, iyadoo loo celinaiyo magdhaw gaaraya Sh. So. 86.636, sida muujinayso warqadda qiimayntu. Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uu san ku jirin kan dhulka.

Lacagta magdhowga waxaa bixin doonta Dowladda Sacuudiga.

Muqdisho, 19 Nofembere 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*WAAN AARGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 44.*
*Muqdisho, 21 Nofembere 1974.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur.

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD
Tr. 19 Nofembere 1974, L. 40.

Qaadid guri dan guud owgeed ee waqti hore la siiyay Xajiya Xalima Cismaan oo ay la wareegatay Dowladda Soomaaliyeed — kana socdo dhismo Masaajidka Weeyn ee Xamar.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed L. 84 ee Rep. taarikhdu markay ahayd 4 Luuliyo 1973, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. L. 16 ee 12 Agosto 1973, taas oo lagu siiyay, gacantana loo geliyay (Libera disponibilità) Jaalle Xajiya Xalima Cismaan cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 693, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Waaberi agagaarka Taalada dhagax tuur;

ISAGA OO ARKAY Warqadda qiimaynta guriga ee 14 Nov. 1974, soo sameeyey Arch. ka tirsan Waaxda Qorshaynta iyo Hindisaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqaot qiimaha oo dhan Sh. So. 79.962.00;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud owgeed gurigaas oo ay leedahay Xajiya Xalima Cismaan, iyadoo loo celinaiyo magrhaw gaaraya Sh. So. 79.962.00. Siday muujinayso warqadda qiimayntu. Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uu san ku jirin kan dhulka.

Lacagta magdhowga waxaa bixin doonta Dowladda Sacuudiga.

Muqdisho, 19 Nofembere 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*WAAN AARGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 45.*
*Muqdisho, 21 Nofembere 1974.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur.

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA
Tr. 17 Febberayi 1975, L. 41.
Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

AGAASOMAHA GUUD BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ku jra Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr 174 ee 17-02-75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26 Nofembar 1968 uu dhigayo.

WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 17-02-75, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| *Lacagta qalaad* | | *Heerka Iibsashada oo Sh. So. ah* | *Heerka Gadidda oo Sh. So. ah* |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 16.9147 | 15.2130 |
| DM. | 1.00 | 2.6469 | 2.6998 |
| Lit. | 103.09 | 1.0000 | ——— |
| Lit. | 101.03 | ——— | 1.0000 |
| F. Fr. | 1.00 | 1.4429 | 1.4718 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.4832 | 2.5329 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.35296 |

Muqdisho, 17-02-75.

SACIID MAXAMDE CALI
Agaasimaha Guud
Guddoomiyaha K. M. G.